

Sidaan ayaad u kala soocaysaa qashinkaaga

Wac tlf. +47 952 53 515 haddii aan tanagga la qaadin wakhtigii loogu tala galay.

Bogga xiga ka akhriso waxa qashinka laga samaynayo. →


Qashinka noolaha

Qashinka aan waxba ku duubnayn ee raashinka iyo- kan beerta ardaagga ee guriga.



TALO

- Bacaha balaastigga ah oo lagu rido qashinka raashinka- iyo kan beerta ardaagga waxay halleeyaan nidaamka lagu samaynayo carrada cusub ee nafaqada leh.
- Waxaa wanaagsan in la isticmaalo bacaha loogu talo galay ee si urka looga hor tago oo uusan tanaggu aad ugu hallaabin.
- Isku day in aadan salka tanagga dhigin caleemaha geedaha, qashinka beerta ardaagga iyo qashinka daata marka miishaar wax lagu gooyo maaddaama ay kuwaasi isku dhegi og yihiin.
- Dhalada lagama samayn karo carro cusub oo nafaqo leh.
- Nadiifi tanagga marka qashinka laga rogo.
- Xilliga qaboobaha waxaa fiican in tanagga wargeys salka loo dhigo, si uusan qashinku qabow dartiis isugu dhegdhegin oo adke u noqon.




Qashinka waraaqaha

Waraaqaha iyo baakadaha aan qoyanayn ama hallaysnayn.



TALO

- Isku ay in aadan tanagga wax ka badan ku ridin, maaddaama ay markaas dhici karto in ay waraaquhu meel qabsadaan. Waxaa weliba ugu daran baakadaha biisaha iyo kartoommada kale.
- Baakadaha waaweyn waa la googoyn karaa si aysan tanagga u qabsan.
- Waraaquhu waa in aysan qoyanayn oo aan wasakh lagu hallayn.
- Looma baahna in aad ka goyso biraha yaryar ee isku haya iyo koollada midna.
- Kaartoonnada cabbitaanka oo dhan dib baa looga faa'iideysanayaa; kuwa waaweyn iyo kuwa yaryar labadaba, fur iyo dabool ha lahaadeen ama yaysan lahaane. Baakadaha ku rid tanagga waraaqaha.



Inta hartay

Qashinka kala duwan ee isku jira iyo qashinka aan lagu ridi karin meelaha kale ee qashinka lagu ridayo.




TALO

- Waxyaalaha qashinka ah ee waaweyn waxaa la geynayaa xarummaha qashinka la geeyo.
- Tanagga ka ilaali in uu buux dhaafto, si aysan shimbiraha iyo xayawaanka kale qashinka u faagannin.
- Balaastigga aan nadiifka ahayn waxaa lagu darayaa qashinka haraaga ah.



Balaastigga wax lagu duubto

Balaastig wax lagu soo duubtay, laakiin hadda nadiif ah oo engegan.



TALO

- Balaastigga wax lagu soo duubtay, laakiin hadda nadiifka ah oo engegan isugu gee bacaha goonida ah ee dhalaalaya ee lagaa siiyo SIM.
- Maalinta la qaadayo qashinka waraaqaha- iyo balaastigga ah, bacda ag dhig ama sur tanagga waraaqaha.
- Haddii ay kaa dhammaan rabaan bacaha balaastigga ah, bac ku gunud tanagga waraaqaha – markaasna darawalka ayaa xirmo cusub kuu ag dhigi doona tanagga waraaqaha marka uu qaado waxa tanagga ku jira. Waxaa kale oo aad xirmo ka soo qaadan kartaa xarunta qashinka ee kuugu dhow.
- Balaastigga wax lagu soo duubtay ee uraya bacda laguma ridayo. Haddii aadan balaastigga biyo qabow ku nadiifin karin, waxaad ku dartaa qashinka haraaga ah.



Dhalada iyo birta

Dhalada iyo birta ay cuntada iyo cabbitaanku ku jireen.



MEESHA LA GEYNAYO: Kontaynarrada SIM ee dhalada iyo birta loogu talo galay, ama xarunta qashinka.

TALO: Dhoobada, koobabka wax kagu cabbo, koobab, sagbad iwm. Ee dhalada ka samaysan kontaynarka laguma ridayo.

Dharka/maryaha

Dhammaan noocyada kabaha, dharka iyo maryaha.



MEESHA LA GEYNAYO: Xarunta qashinka. Bacaha leh midabka buluugga iyo guduudka isugu jira waxaad ka heli kartaa dhammaan xarummaha qashinka ee SIM.

TALO: Wax dhib ah ma laha haddii uu dharku jeexjeexan yahay. Maxaa yeelay Fretex ayaa mar kale dib u isticmaalaysa oo wax cusub ka samaynaya.

Qashinka halista ah

Qashinka hawada dikhayn kara ama dadka iyo xayawaanka dhaawici kara.

MEESHA LA GEYNAYO: Xarummaha qashinka.

TALO: Haddii uu shaki ku galo: Gee meeshi la geyn lahaa haddii uu qashin halis ah yahay, Xusuuso in aad dhallooyinka/gasacadaha ku qorto waxa ku jira.



SIM

Haddii aan tanagga lagaa qaadin

Wac teleefanka soojeedka leh ee: +47 952 53 515.



Haddii uu tanagga qashinku jabo / Haddii tanagga qashinka la beddelayo

Soodhoweyntannada ka soo wac tlf-ka +47 53 45 78 50 ama iimayl u soo dir sim@sim.as.

5-tii toddobaadba mar ayaa la beddelaa.



Waxaa kale oo aad eegtaa www.sim.as si aad warbixin dheeri ah uga hesho waxyaalaha ay ka midka yihiin:

- Kala soocidda qashinka oo luuqado kale ku qoran
- mararka sida gaarka ah nadaafadda looga shaqaynayo
- Kalandaariyaha waxkhtiyada qashinka la qaado
- Carro nafaqo leh samayn
- Maalinta qashinka la qaado
- kireysiga kontaynarrada
- qiimaha



SIM

Sunnhordland
Interkommunale
Miljøverk IKS

Svartasmogvegen 219
N-5419 Fitjar
Teleefan: 53 45 78 50
Iimayl: sim@sim.as
www.sim.as

Maxaa qashinka laga sameeyaa?

Qashinka cuntada- iyo beerta ardaagga:

Waxaa laga dhigaa carro cusub oo nafaqo leh oo laga soo gadan karo dhammaan xarumaha qashinka la geeyo ee SIM.



Qashinka waraaqaha ah:

Waxaa laga dhigaa waraaqo/baakado cusub.



Qashinka haraaga ah:

Tamar ahaan baa loo isticmaalaa oo waxaa loo beddelaa koronto iyo tamar kul oo meel kale laga keenay.



Waxyaalaha balaastikada ah ee wax lagu duubto:

Waxaa laga dhigaa waxyaalo balaastig ah oo cusub. Sida tusaale ahaan saxaaradaha, gasacyo, tanagga qashinka, baraf-xaaqo, kuraasta xafiisyada, weelasha ubaxa la geliyo, tuubbooyin, tuubbooyin caag ah, katabbaanno, dhar (funaanad), qaybo gaari, dhalooyinka cabbitaanka, bacda aluminiumka ah, bacaha alaabaha lagu qaato iwm.



Qashinka halista ah:

Waa la duugaa ama baabbi'iyaa.



Dhalada – iyo waxyaalaha wax lagu duubo ee birta ah:

Waxaa laga dhigaa dhalo cusub, nooc galaas ah, aalad wax lagu awdo, musbaarro, boolal, birta waraaqaha layskula qabto, qalabka beerta ardaagga, qalabka wax lagu duubto, qaybaha digsiga lugaha baabuurta iyo qaybaha baaskillada.



WAKHTIYADA AY FURAN YIHIIN XARUMMAHA QASHINKA*

*Waa xiran yihiin ciidaha masiixiga ee Páskeaften, julaften iyo maalinta sanadka cusub.

AUSTEVOLL, PORSDALEN

Isniin iyo khamiis saacadaha 10.00-18.00

1-da abriil-30-ka sibteembar.:

Labadii sabtida mid (toddobaadyada kisiga ah) saacadaha, 09.00-14.00.

1-da oktoobar -31-da maarso.:

Sabtida bisha ugu danbaysa, saacadaha 09.00-14.00

BØMLO, HOLLUNSDALEN

Isniin iyo arbaco saacadaha, 12.00-18.00 – Talaado iyo khamiis 07.00-15.00

1-da abriil-30-ka sibteembar.:

Labadii sabtida mid (toddobaadyada kisiga ah) saacadaha, 10.00-14.00.

1-da oktoobar -31-da maarso:

Sabtida bisha ugu danbaysa, saacadaha, 10.00-14.00

FITJAR, SVARTASMÅGET

Isniin – saacadaha, 10.00-18.00

KVINNHERRAD, HUSNES INDUSTRIOMRÅDE

Isniin iyo khamiis, saacadaha 12.00-18.00 – Talaado iyo jimco, saacadaha, 08.00-13.00

1-da abriil-30-ka sibteembar.:

Labadii sabtida mid (toddobaadya dhabanka ah) saacadaha, 09.00-14.00.

1-da oktoobar -31-da maarso:

Sabtida koowaad ee bisha, saacadaha, 09.00-14.00

STORD, HEIANE MILJØSENTRAL

Isniin, arbaco iyo khamiis saacadaha 10.00-18.00

Talaado iyo jimco saacadaha 07.00-15.00 - Sabti saacadaha 09.00-14.00

SVEIO, SVEIÅSEN

Isniin iyo khamiis saacadaha, 10.00-18.00

TYSNES, EREDALEN

Isniin iyo khamiis saacadaha 10.00-18.00

1-da abriil -30-ka sibteembar.:

Labadii sabtida mid (toddobaadyada dhabanka ah) saacadaha, 09.00-14.00.

1-da oktoobar -31-da maarso:

Sabtida bisha ugu danbaysa, saacadaha. 09.00-14.00



La soo deg abka SIM adiga oo **Google Play™** ama **App Store®** ka raadinaya SIM tømmekealender.



Nagu soo booqo Facebook facebook.com/SIMrenovasjon